IHMISKAUPAN UHRIEN
AUTTAMISJÄRJESTELMÄ
WWW.IHMISKAUPPA.FI

somali - soomaali

# DHIBBANAHA SOO MARAY KA GANACSIGA DADKA WUXUU XAQ U LEEYAHAY IN LA CAAWIYO

Warbixintaan waxaa ay ka hadlaysaa caawimaadda loogu talaggalay dhibbanaha soo maray ka gancsiga dadka

Nikdaamka caawinta ee dhibbanaha ka ganacsiga dadka (nidaamka caawinta) waa hawlwadeen dowladda ah, kaasoo caawinaaya dhibbanayaasha soo maray ka ganacsiga dadka ee ku sugan dalkaan Finland.

## YAA loogu talaggalay caawimaaddan?

Waxaad noqon kartaa macmiil ka tirsan nidaamka caawinta ee dhibbanaha soo maray ka ganacsiga dadka, haddii aad tahay

- dhibbane soo maray ka ganacsiga dadka, sababtaas awgeedna aad caawimaad u baahan tahay.
- ilmo ama carruur soo maray ka ganacsiga dadka oo Finland jooga, kaasoo u baahan caawimaad.
- Qof caawiye ka ah baaritaanka la xiriira dambiga ka ganacsiga dadka, haddii aad u baahan tahay caawimaad khaas ah.

Nidaamka caawinta wuxuu caawiyaa dhammaan dadka ka kooban jinsiyadaha kala duwan, da' kasta oo ay jiraan, jinsi kasta oo ay yihiin iyo diin kasta opo ay aaminsan yihiinba. Xittaa dadka u dhashay dalkaan Finland waa uu caawiyaa.

Waad heli kartaa caawimaad, xittaa haddii aadan Finland wax sharci ah ku lahayn. Waxaad heli kartaa caawimaad, xittaa haddii aad adigu ku eedeysan tahay dambi.

## Waad heli kartaa caawimaadda, xittaa haddii aadan soo sheegin wax dambi ah

Caawimaad waad ka heli kartaa nidaamka caawinta, xittaa haddaa aadan doonayn inaad dambiga u sheegto booliska. Nidaamka caawintu waxba uma gudbinaayo booliska. Haddii aad doonayso inaad samayso wargelinta dambiga, waxaad heleysaa caawimaadda arrinkaas la xiriirta.

## CAAWIMAAD NOOCEE AH ayaad ka heleysaa nidaamka caawinta?

Caawimaadda nidaamka caawinta waxaad heli kartaa, marka aad tahay macmiil ka tirsan nidaamka caawinta.

caawimaaddu waxay tusaale ahaan noqon kartaa arrimaha soo socda:

- Talosiin iyo hagis
- Caawimaadda samaynta arrinka ku saabsan wargelinta dambiga, haddii aad doonayso inaad samayso wargelinta dambiga
- Taageero iyo ammaan xilliga lagu guda jiro hawlaha dambi baarista
- Caawimaadda la xiriirta raadsashada qareenka iyo qof caawiye ah, haddii aad arrimahaas u baahan tahay
- Adeegyada caafimaadka
- Adeegyada bulshada
- Degaan ammaan ah
- Taageero dhaqaale, haddii aadan lacag haysan
- Adeegyda turjumista ee hadalka iyo qoraalka ah, haddii aad arrimahaas u baahan tahay

Waxaa intaa u dheer dadka ajaanibta oo loogu talaggalay:

- Haddii aad Finland ku joogto sharci la'aan, waxaa nidaamka caawinta uu ku siin doonaa

*muddada ka fiirsiga.* Muddada ka fiirsiga waxaa loola jeedaa, in aad Finland u joogto qaab sharci ahan ah 1-6 bilood, xilligaasna aan adiga waddanka lagaa saari karin.

- Taageeridda dib u noqoshada ee ammaanka ah, haddii aad doonayso in aad dalkaagii dib ugu laabato
- Talosiinta iyo hagista la xiriirta codsiga sharciga degganaanshaha dalka

Waxaan annaga iyo adigu ka wada fekeri doonnaa, wixii caawimaad ah ee aad u baahan tahay.
Adiga khasab kuguma ahan inaad qaadato caawimaad, aadan u baahnayn.

## Sidaan ayaa adeegyada loo qabanqaabinayaa

Nidaamka caawinta waxaa uu kaa caawinayaa adeegyada aad u baahahn tahay

- Haddii aad degaan ku leedahay dalkaan Finland

  Finland adeegyada waxaad ka heleysaa aagga samafalka ee aad deggan tahay. Nidaamka caawinta ayaa wadashaqayn la yeelanaya aagga samafalka. Waxaad adigu heleysaa talaosiinta iyo hagista nidaamka caawinta.

- Haddii aad tahay magangalyoddoon

  Waxaad adeegyadaada aasaasiga ah ka heleysaa xerada qaxootiga. Nidaamka caawinta ayaa kaa caawinaya sidii aad wadashaqayn joogto ah ula yeelan lahayd xerada qaxootiga. Sidoo kale waxaad nidaamka caawinta ka heleysaa talosiin iyo hagis.

- Haddii aadan wax degaan ah ku lahayn Finland

  Nidaamka caawinta ee dhibbanayaasha soo maray ka ganacsiga dadka ayaa kuu qabanqaabinaaya adeegyada.

## Sidan soocota ayaad ku noqon kartaa macmiilka nidaamka caawinta

Shaqaalaha sooshaalka, urur, booliska ama shaqaalaha xarunta diinta ayaa kugu soo hagi kara nidaamka caawinta, si aad caawimaad u hesho. Waxay adiga kugu soo hagi karaan nidaamka caawinta oo keliya, haddii aad arrinkaas oggolaansho u siiso. Oggolaansho bixinta waxaa loola jeedaa, in ay macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed u gudbin karaan nidaamka caawinta.

Nidaamka caawintu wuxuu u baahan yahay macluumaadka ku saabsan, waxa adiga kugu dhacay, iyo arrinka ku saabsan caawimaad noocee ah ayaad u baahann tahay.

Haddii nidaamka caawintu uu u baahdo macluumaad dheeraad ah oo xaaladdaada la xiriira, adiga ama hawlwadeennada kale ee dowladda ayuu arrinkaas weydiin karaa.

Iyadoo macluumaadkaas lagu salaynaayo ayuu shaqaalaha nidaamka caawintu wuxuu qiimeynayaa, in ay suuraggal ahayd inaad soo martay ama noqotay dhibbane ka ganacsiga dadka iyo in kale, iyo in aad sababtaas awgeed u baahann tahay caawimaadda nidaamka caawinta.

## Adiga nafsad ahaantaada ayaa codsan kara macmiilnimada

Adiga nafsad ahaantaada ayaa codsan kara macmiilnimada nidaamka caawinta. Waad soo wici kartaa ama waxaad u soo diri kartaa iimeyl nidaamka caawinta, waxaadna uga warrami kartaa xaaladdaada.

Adiga lagaagama baahna inaad xaqiiq ahaan u hubto, inaad soo noqotay dhibbane soo maray ka ganacsiga dadka.

## Nidaamka caawinta ayaa ku siinaya go'aanka

Mar walba waxaad ka heleysaa nidaamka caawnta go'aan qoraal ahaan ah oo u saabsan, in nidaamka caawinta uu kuu qaadan karo macmiil ahaan iyo in kale.

## Waxaad la soo xiriiri kartaa adigoo aan magacaaga sheegin

Haddii aad doonayso waxaad la soo xiriiri kartaa adigoo aan sheegin magacaaga iyo cinwaankaaga. Waxaadna kala sheekeysan kartaa nidaamka caawinta xaaladdaada, waadna ka fekeri kartaa in aad doonayso inaad macmiil ka noqoto nidaamka caawinta iyo in kale.

Waxaad kala soo xiriiri kartaa qoraal ahaan dhanka bogga internetka ee nidaamka caawinta ee cinwaankiisu yahay www.ihmiskauppa.fi, adigoo magaacaga aan sheegeynin.

Waxaad kala so xiriiri kartaa dhanka iimeylka la sugay ammaankiisa.

## Nidaamka caawinta waxaa saaran waajibka ah in ay sirta ilaaliyaan

Nidaamka caawinta waxaa uu macluumaadkaaga oo dhan u falanqayn doonnaa si kalsooni leh.

faahfaahinta dheraadka ah ee ku saabsan sida macmuulaadkaaga loo falanqaynaayo, waxaad ka heleysaa bogga cinwaankiisu yahay: www.ihmiskauppa.fi/myinfo

- Nidaamka caawinta waxaa uu ku qorayaa macaluumaadka la xiriira aqoonsigaaga iyo macmiilnimadaada, diiwaanka macaamiisha ee nidaamka caawinta.
- Falanqaynta macluumaadka mar walba waxaa aasaas u ah wax ka qabashada hawlaha ee ku salaysan sida sharciga looga dejiyay.
- Macluumaadka la keydiyay waa kuwo sirtoodu xifdisan tahay. Shaqaalaha macluumaadka arkaaya ama falanqaynaaya waxaa saaran waajibka ah in sirta la ilaaliyo. Macluumaadka waxaa falanqaynaaya oo keliya, shaqaalaha haysta xuquuqda sharci ahaaneed ee arrinkaas la xiriirta.
- Macluumaadka la keydiyay waa kuwo sirtoodu xifdisan tahay, Mana u oggolaan karaan inay arkaan ama isticmaalaan macluumaadkaas cid kale oo iyaga ka baxsan.
- Macluumaadka sirtooda la xifidyay ee nidaamkla caawinta, waxaa macluumaadkaas lagu heli karaa oo keliya adiga oggolaanshahaaga, ama sidii kale oo si gaar ahaan ah sharciga looga dejiyay.
- Maacluumaadkaaga lama siinaayo dalal kale, oggolaanshahaaga la'aantiis.

## Halka lagala soo xiriiri karo nidaamka caawinta ee dhibbanayaasha soo maray ka ganacsiga dadka

### Tel: +358 295 463 177

Shaqaalaha nidaamka caawinta waxaa ay ka jawaabaan telefoonka Isniin – Jimce, saacadda 8:00 - 16:15

Xilliyada kale waxaa ka jawaabaya xerada qaxootiga ee Joutseno. Waxaad markaa u reebi karaa codsiga farriinta ee ah in dib laguu soo waco, ama waxaad u sheegi kartaa baahidaada caawimaad ee degdegga ah.

### Iimeylka: ihmiskauppa.auttamisjarjestelma@migri.fi

### www.ihmiskauppa.fi

Bogga internetka ee Ihmiskauppa.fi-waxaad ka heleysaa macluumaadka ku saabsan ka ganacsiga dadka, nidaamka caawinta iyo ururrada caawimaadda siiya dhibbanayaasha ka ganacsiga dadka. Waxaad nidaamka caawinta kala soo xiriiri kartaa dhanka boggaas internetka, adigoo aan magacaaga sheegin.